


FAAFINTA RASMIIGA AHI



الجريدة

الرسالة

Sannadka 13aad Muqdisho 1 Jenaayo 1985 L. 6
JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOMAALIYA

الصومال الديموقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sana-dii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxlii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasauradda Lacagta.

K O O B N I I N

QA YBTA

KOOWAAD

SHACI

W. M.

LABAD

QAYBTA

X E E R

XEER-SHARCI L. 3 ee 23 Maajo 1985, Can-
shuurta wax soo saarka.

Bog; 347

DECREE N. 3 on 23 May 1985, Excise Tax
Act.

» 356

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 20 ce
25 Maajo 1985, Billad Maar oo Wadda-
nimo.

364

XEER MADAXWEYNAHA JDS. L. 21 ee
25 Maajo 1985, Billad Qalin Waddani-
mo ah.

» 360

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

XEER MADAXWEYNAHA JDS. L. 23 ee 30 Maajo 1985
Akademiyaha Sare ee Straateejiyada Sayid Maxamed Cabdulle Xasan.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Shareiga f Abriil 1960 L. 15aad Dhimaha XDS;

MARKUU ARKAY: Qod. 9aad Sharciga tirsigiisu yahay 6 ee soo baxay 31.12.1969;

MARKUU DHAGEYSTAY: Talo sco jeedinta Golaha Wasiirada Jamhuuriyadda Dimeqaraadiga Soomaaliya;

ISAGOO TIXGELIYHEY: Ujeedada iyo Himilada Kacaanka 21ka Oktoobar oo ku salaysan in aqoontu tahay furaha Horumarka Muqtamac kasta.

ISAGOO TIXGELIYHEY: Ahmiyadda wayn ee sare u qaadoda tabta tababarrada Ciidanka iyo guulihii laga gaaray jiritaanka Kuiliyadda Ciidanka Lugta ee Jaalle Siyaad iyo Abbaanduulka Axmed Gurey;

ISAGOO TIXGELIYHEY: Sco jeedinta Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga Jamhuuriyadda Dimeqaraadiga Soomaaliya.

WUXUU XEERIYHEY

Qod. 1aad

In la abuuro Akadeemi Sare oo lagu barto Istaraateejiyada, Dhaqaalah, Siyaasadda, Bulshada, Caskariga iya Dublumaasiyada.

Waxaa Akadeemiga lagu magacaabay «AKADEEMIGA SARE EE ISTARAATEEJIYADA SAYID MAXAMED CABDULLE XASAN»

Akadeemigu wuxuu ka kooban yahay 2 Kulliyadoon.

b) Kulliyadda Sare ee Istaraateejiyada Difaaca

iyo Nabadgeleyadda Qaranka, waxaana wax ku baranaya Mas'uuliyiinta sare ee Qaranka iyo saraakiisha sare ee Ciidamada Qalabka Sida Jamhuuriyadda Dimoqoraadiga Soomaaliya.

- t) Kulliyadda sare ee Istaraateejiyada Dagaalka, waxaana wax ku 'baranaya saraakiisha sare ee Ciidamada Qalabka Sida Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya.

Qod. 2aad

Xarunta Akadeemiga waxay noqonaysaa magaalo Madaxda Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya.

Qod. 3aad

Heerka Waxbarasho ee Akadeemigu wuxuu noqonayaas heer Akademiyeedka Caalamiga ah iyo kuwa la midka ah ee ka jira Adduunka.

Qod. 4aad

Maamulka Akadeemigu wuxuu hoos imaanayaa Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya.

Qod. 5aad

Habka maamulka Akademiga, qaabkiisa dhismo, waxbarasho wuxuu ku soo baxayaa Xeer hoosaadka ay soo diyaariso Wasaaradda Gaashaandhigga Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya.

Qod. 6aad

Macallimiinta wax ka dhigeysa Akadeemiga waxay noqonayaan mas'uuliyiinta sare ee Qaranka iyo aqoon yahanno sare x laga soo xulay Hay'adaha kala duwan ee Dawladda iyo Ciidamada Qalabka Sida.

Qod. 7aad

Wasaaradda Gaashaandhigga waxay kala imaan kartaa Dalka Dibadiisa Khubaro iyo macallimiin wax ka dhiga Akadeemiga haddii loo baahdo.

Qod. 8aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa 30ka May 1985.

Muqdisho, 30 May 1985

MADAXWEYNAHA JDS

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre